

## **Macluumaad dhameystiran oo loogu talo galay waalidiinta laga bilaabo Maarso 24, 2020**

Iyada oo la raacay talo soo jeedinta Maamulka Caafimaadka Dadweynaha, waxaan ka hawl-galnaa iskuulka Alléskolan.

Laga bilaabo 18 kii maarso waxaan ku hawlaneyn sida aan u hirgalin lahayn waxbarashada masaafada. Masaafada waxbarashada macnaheedu waa barida fogaanshaha, waxaana lagu baraa qaabka uu iskuulku isticmaalo oo uu mariyo sida, Ping pong iyo google classroom. Xaaladu waa mid nagu cusub dhammaanteen waxaanse u shaqeyneynaa sida ugu adag, si loo helo qaabab waxbaris oo ku wada shaqeyn karaan macallimiinta iyo ardeyda labadaba. Haddaba kaalinteenoo waa mid ku saleysan daddaal dheeri ah.

### **Warbixin**

Macluumaadka ay wadaagaan maamulka iskuulka iyo caafimaadka ardayda ee ku jiheysan ardayda, macallimiinta iyo shaqaalaha dugsiya waxa ay ka helayaan Ping pong. Daryeel bixiyeyaashana waxa ay si joogta ah ugu wergeliyaan mareegta [www.alleskolan.eu](http://www.alleskolan.eu)

### **Maalmaha Iskuulka**

Waxaan raaci doonaa jadwalka joogtada ah xitaa inta lagu gudajiro mudada waxbarashada masaafada. Hadafkayagu waa inaan ilaalino inta ugu badan ee "caadiga" maalin dugsiyeedka intii suurtagal ah xaaladdan. Koorsooyinka qaarkood / maadooyinka qaarkood ayaa loo baahan yahay isbeddelada ayaa lagu sameeynayaa qorshaynta, qayb ahaan iyada oo lagu beddelayo hab aan tababar ahayn kaas oo wax ku ool ah oo cilmi ah.

### **War-bixinta imaanshaha/ ogeysiinta jirrada**

Waxaan sidoo kale raaci doonaa sidii hore oo kale. Tan macnaheedu waa muhiim inaad soo sheegto xanuunkaaga ilmahaaga haddii ay xanuunsan yihiin.

Soo sheeg fasaxa xanuunka haddi - ardayda ka yar yahay 18 sano

Waxaad xanuunka ku soo sheegtaa adigoo adeegsanaya barnaamijka Tieto Education. Haddii aadan haysan banki ama aadan awoodin adeegso

barnaamijka ama email ugu dir adiga oo oo marinaya mareegta  
[alleskolan@alleskolan.eu](mailto:alleskolan@alleskolan.eu)

Soo sheeg fasaxa xanuunka haddii aad ka weyn tahay 18 sano. Kuwa ardayda ka weyn 18 sano jir, fasax jirro ayuu ku soo gudbin karaan Tieto. Waxa aad ka gali kartaa mareegta dugsigga (www.alleskolan.eu) oo xulo sumadda Tieto.

### **Warbixinta IKT (Macluumaadka iyo teknolojiyada isgaarsiinta)**

Waqtiyada barashada fogaanta, waxaa muhiim ah in aaladaha dijitaalka ah ay si sax ah u shaqeeyaan. Sida:- kombiyuutarka / ipad / chromebook strular waxay leeyihiin IKT meesha waxayna ka caawin karaan. Xafiiska soo dhoweeyntu waxa uu ku yaalaa Guriga C. Waxaa uu na furan yahay Isniinta-Khamiista 8 subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo iyo Jimcaha 8-da ilaa 3-da galabnimo. Qadada waa uu xiran yahay 12: 00-12: 30 °. Waxaad kale xiriiri kartaa adoo galaya e-log "felanmälan" ama ka wici kartaa tel. 0582-355 45.

### **Caafimaadka ardeyga**

Xitaa inta lagu jiro xilliyada waxbarashada masaafada, caafimaadka ardayda ayaa shaqeysa oo ay ka heli karaan ardayda. Waxa ayna kala xiriiri karaan sida, boostada elektaroonigga ah ama teleefanka, wixii intaa dheer oo ku saaban macluumaadkooda kala xiriirmareegta dugsigga, cinwaanka caafimaadka ardayga.

### **Si guriga wax looga barto**

Wax barashada guriga oo ah habka waxbarashada masaafada waa xaalad ku cusub ardaydeena. Halkan waxaan u loo baahan yahay in aan ka caawin ama ka taageerno da'yarteenaa sidii ay u heli lahaayeen hab wanaagsan iyo nidaamyo joogto ah.

Kooxda qaabilsan caafimaadka ardayga ee dugsigga ayaa leh isu soo ururin talooyin ku saabsan ardayda . Xor baad u tahay inaad kala hadasho ilmahaaga talooyinkan:

1. Subaxa hore u kac sida caadiga ah: qubeyso, dharkaaga xiro, oo quraac cun.
2. Ku labiso dhar aad inta badan gashato marka aad dugsigga aadayso.
3. La soco jadwalkaaga joogtada ah, haddii aadan mid cusub ka helin dugsigga.

4. U diyaarso goob casharkaaga, xusuusnow inaad hesho meel deggan oo aad wax ku baran kartid, hubi qalabkadugisga in aad haysatid.

5. Gal barnaamijka saxda ah 5 daqiiqo ka hor kulanka ugu horreeya ama casharka inta uu bilaaban.

6. Xusuusnow inaad qaadatid biririf, sida maalin dugsiyeed caadi ah. Xor baad u leedahay inaad hesho waqti qado.

Waxaan ku siiney talooyin ku saabsan taxanahan oo Idaacadda Waxbarashada ay daabacday iyadoo filimaan gaaban oo leh talooyin ku saabsan sida ardaydu ku guuleysan karaan daraasadooda masaafada. Barnaamijka waxaa lagu magacaabaa Orka plug.

<https://urplay.se/program/215476-orka-plugga-plugga-smart-hemma>

### **Goorma ayaynu bilaabaynaa iskuulkii caadiga ahaa?**

Waqtigan xaadirka ah ma ogin. Balse waxaa aynu raacaynaa macluumaadka iyo talooyinka Maamulka Caafimaadka Dadweynaha.

### **Su'aalo ama dib u eegis**

Haddii aad adiga oo ah qofka mas'uulka ah ardayga, aad qabtid su'aalo ama walaac, ha ka labalabeyn inaad marka ugu horreysa kala soo xiriirto macallinka / lataliyaha sida wadajir ah u abaartaan dhinaca saxda ah.

Salaan wanaagsan,

Skolledningen på Alléskolan